



## Sahanka Daneynta Shatiga Hay'adeed ee Tijaabada ah Interest Survey for Organizational License Pilot

Waad Ku mahadsan tahay daneynta aad daneynayso Mashruuca Shatiga Hay'adeed ee Tijaabada ah. Waxaan dooneynaa in aan wax badan ka oggaano barnaamijkaaga iyo sida aad dooneyso in aad uga qaybgasho.

DCYF ayaa mudnaanta wakaaladda ka dhigtey in ay meesha ka saarto kala duwanaanta jinsi waxayna u qaadatey sinnaanta sinjiga iyo cadaaladda bulshada sida qayimka udub-dhexaadka ah u ah wakaaladda. Si aad wax badan u oggaato booqo [Mudnaanaha Istiraatiijiga ah ee DCYF](#).

Kuwa buuxiya sahanan daneynta ayaa waxaa ula soo xiriiri kara Mashruuca Shatiga Hay'adeed ee Tijaabada ah wacitaan la socosha ah si ay u ururiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaaga iyo sida barnaamijkaaga u taageero sinnaanta sinjiga.

**Shuruudaha Tijaabada ee Hadda** (shuruudaha tijaabada ee dheeraadka ah ayaa waxaa la sameyn karaa ka-dib ka-qaybgalka bulshada iyo fikrad dhiibashada):

- Hal mulkiile ama shirkad maamuleysa ama codsaneysa in ay maamusho ugu yaraan saddex goobood ilaa ugu badnaan toddobo goobood.
- Goobuhu waa in ay codsanayaan ama durba shati u haystaan ama loo aqoonsan yahay sida xarun lagu daryeelo carruurta oo ka soo baxaysa [Cutubka 110-300 JAANGOYADA TAYADA AASAASIGA AH EE BARNAAMIYADA WAXBARASHADA CARRUURTA YARYAR](#) ama barnaamijka da'da iskuulka ee ka soo baxaya [WAC 110-301 JAANGOYADA TAYADA AASAASIGA AH EE BARNAAMIYADA CARRUURTA JIRTA DA'DA ISKUULKA](#).

Magaca Ururka ama Shakhsiga:

Qofka Lala Xiriirayo:

Telefoonka:

limayl-ka:

Dooro ikhtiyaarka sida ugu wanaagsan u sharxaya ururkaaga:

- Wakaalad Dowladeed     Urur aan faa'iido u shaqeyn     Ganacsi gaar loo leeyahay oo faa'iido u shaqeeya  
 Ma garanayo

Guud ahaan immisa goobood ayaad qorsheynaysaa in ay hoos yimaadaan hal shati hay'adeed? (calaamadee hal sanduuq oo keliya)

- 3     4     5     6     7

Waa maxay kartida carruurta goob kasta ee aad qorsheynayso in ay hoos timaado hal shati hay'adeed?

Goobta 1aad:    Goobta 2aad:    Goobta 3aad:    Goobta 4aad:    Goobta 5aad:    Goobta 6aad:    Goobta 7aad:

Goobahan: (calaamadee hal sanduuq oo keliya)

- Dhammaan ma yihiin kuwo shati haysta     Dhammaan ma u baahan doonaan in ay shati haystaan  
 Qaar ayaa shati haysta qaarna waxay u baahan doonaan in ay shati haystaan

Goobahani waxay ku yaallaan: (calaamadee dhammaan sanduuqyada ku habboon)

- Degaamada miyiga ah ee Washington     Degaamada u dhaxeeya miyi-magaalo ee Washington  
 Degaamada magaalada ah ee Washington

Waa maxay da'aadda kala duwan ee carruurta aad ugu adeegi doonto goobaha aad qorsheynayso in ay hoos yimaadaan hal shati hay'adeed? (calaamadee dhammaan sanduuqyada ku habboon)

- Dhalasho ilaa 13 sano, 0 bilood     2 sano, 6 bilood ilaa 6 sano, 0 bilood (dugsi-horaad)  
 5 sano, 0 bilood ilaa 13 sano, 0 bilood     Kale:  
(da'da-iskuulka oo keliya)

Ka-qaybgaleyasha mashruuca tijaabada ah waa in ay leeyihiin ugu yaraan hal goob oo adeeg bixinaysa, ama waa in ay ku yaallaan, ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:

(calaamadee dhammaan sanduuqyada ku habboon goobahaaga)

- Bulshooyinka dakhligoodu hooseeya, la garbiyo sida ay tilmaameen 20% ama in ka badan ee qoysaska loo adeegay ayaa hela taageerada daryeelka carruurta ee la kabo  
 Ugu yaraan hal goob oo ku dhex taalla bulshooyinka madowga ama taageerta sinnaanta sinjiga ee guud ahaan gobolka\*  
 Ugu yaraan hal goob oo ku taalla degaan uu si aad ah u saameeyay cudurka safmarka ah ee COVID-19\*

\* Sida ay tilmaantey [Deeqda Xasillinta Daryeelka Carruurta ee DCYF](#).

Waxaad dib-u-eegi kartaa macluumaadka ku yaalla [Shaashadaha Guud ee Waxbarashada Carruurta Yaryar](#) si aad u hesho degaamada uu saameeyay cudurka COVID-19.

Haddii aadan lagu xulan ama aadan qorsheynayn in aad codsato mashruuca tijaabada ah, ma jeclaan lahayd in lagu la soo xiriiro oo hab kale lagaaga qaybgeliyo? (haddii ay haa tahay, calaamadee dhammaan sanduuqyada ku habboon)

- Ka-qaybgal aqoon-isweydaarsi lagu nakh-shadeynayo tijaabada  
 Ka-qaybgal koox korjoogteyn si aad u maqasho wararkii ugu dambeeyay oo joogto ah una bixiso fikrad ku saabsan nakh-shadda tijaabada ah  
 Kale: